

Amniga gaaska iyo adeegga



Dayactirada gaaska

Homes for Islington waxaa ka go'an in

- Ay ku dhameystirto dayactirka 24 saac gudahood marka ay hesho warbixin ku saabsan in kululeeyayaasha ama biyuhu haleysan yihiin inta lagu jiro “xiliga wax la kululeysto” (1da Oktoobar ilaa 1da Maajo).
- Ay aan kugu siino biyo kulul ama kululeeyayaal ku meelgaar a 24 saac gudahood haddii aan ku xalin weyno dhibaataada si degdeg ah (inta lagu jiro xiliga wax la kululeysto).
- Aan Kuugu qabano ballan dayactirada aan degdegga aheyn, waqti adiga kugu haboon.
- Aan kuugu sheegno sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan haddii aysan awoodin in ay ilaaliyaan waqtiga ballanta kuuna soo bandhigaan taariikh iyo waqti kale oo kugu haboon.
- Aan kuu qabano ballan kale waqti kugu haboon haddii aan awoodi weyno in aan ku dayactiri weyno cilladda booqashadeena koowaad.
- Aan ku dhameystirno dhammaan dayactirada aan degdegga aheyn mudo 28 saac gudahood ah laga bilaabo marka cilladda lasoo tebiyay.

Dayactiridda qalabka gaaska

- Waxaanu jeegareyn doonnaa amniga qalabka gaaska ee aan ku rakibnay guryaha kireysteyaasheena sanad walbo.
- Warqad ayaanu kuu soo diri doono marka jeegareynta amniga waqtigeeda la gaaro. Markaa ka dibna waxaanu kuu diyaarin doonnaa ballan kugu haboon. Ballamada waxaa badanaa la qabtaa maalmaha todobaadka ee la shaqeeyo inta u dhexeysa 8da subaxnimo ilaa 5ta galabnimo.
- Haddii ballamada maalintii aysan kugu habooneyn, waxaanu kuu soo bandhigi doonnaa ballan maalmaha todobaadka ugu dambeeyo ee fasaxa ah.

Sida aan kuula macaamileyno

Mar allaale marka aad la macaabisho shaqaalaheena ama qandaraaslayaasheena, waxay ahaan doonaan

- kuwo edeb leh
- kuwo qaadayo mas'uuliyadda howlahaaga dayactirka iyo adeegga, kulana socodsiinayo
- kuwo kuu sheegayo magacyadooda
- kuwo xiran calaamadda garashada

Mar allaale marka aad nasoo wacdo, waxaanu yeeli doonnaa

- in aan uga jawaabno wicitaanaaga lix telefoon dhicitaan gudahood inagoo kuu raacineyno salaam, magic iyo goobta
- in aan dib kuu soo wacno 24 saac gudahood haddii aad fariin noo dhaafto

Haddii aad warqad noo soo dirto, waxaanu yeeli doonnaa

- in aan kugu ogeysiino in aan helnay warqaddaada seddax maalmo shaqeed gudahood
- in aan si buuxdo kuugu soo jawaabno toban maalmo shaqeed gudahood

Arimo muhiim ah

Haddii aad u maleyso in gaas kuu urayo

- Ha daarin ama ha demin korontada ama qalab kale.
- Sigaar ha cabin ama ha isticmaalin dab holcaya.
- Ka demi tubada qaasku maro mitirka. Haddii aadan garaneyn meesha mitirku ku yaal, fadlan nala soo xiriir.
- Fur albaabada iyo daaqadaha si aad uga taxadirto gaaska.

Ka wac Saldhiga korontada Qaranka si degdeg ah halkan on 0800 111999 ama kala xiriir HFI Direct halkan 0800 694 3344 ka dibna anaga ayaa kuu sii gudbin doono.

Yaa lagala xiriirayaa su'aalaha gaaska, gaaska kululeynta dhexe ama biyaha kulul Haddii ay wax dhibaato ah kaa heysato gaaska, gaaska kululeeyayaasha dhexe ama biyaha kulul, kululeeyayaasha la wadaago ama biyaha kulul, waxaad ka wici kartaa HFI Direct halkan 0800 694 3344. Wicitaankani waa bilaash, ilaa aad isticmaaleyso telefoonka gacanta.

Ka dibna waxaanu kuu diyaarin doonnaa ballan inagoo isticmaaleyno qandaraaslayaasheena dayactirka Kier Islington, British Gas ama EPS Plc, kuwaas oo shaqaaleysiyo injineero diwaan aqoonle oo ka diiwaangashan CORGI si ay shaqada u qabtaan.

Nagala soo xiriir

Central Street Area Housing Office

85 Central Street, London EC1V 8DT

Telefoon: 020 7527 6250

Fax: 020 7527 6207

Email: csa@homesforislington.org.uk

Minicomka: 020 7527 6202

Holland Walk Area Housing Office

85-88 Holland Walk

London N19 3XS

Telefoonl: 020 7527 7480

Fax: 020 7527 7407

Email: holland.walk@homesforislington.org.uk

Minicomka: 020 7527 7405

Lyon Street Area Housing Office

1 Lyon Street, London N1 1DQ

Telefoon: 020 7527 6880

Fax: 020 7527 6827

Email: lyon.street@homesforislington.org.uk

Minicomka: 020 7527 6830

Upper Street Area Housing Office

Northway House, 257 Upper Street, London N1 1RU

Telefoon: 020 7527 5300

Fax: 020 7527 5301

Email: upperstreet.AHO@homesforislington.org.uk

Minicomka: 020 7527 5301

Visit our website at

www.homesforislington.org.uk

